MAGACA MACMIILKA	LAMBARKA AQOONSIGA EE ACES

Xuquuqdaada iyo Mas'uuliyadahaaga Marka Aad Hesho Adeegyada ay Bixiyaan Maamulka Nolosha Guriga iyo Bulshada iyo Maamulka Naafonimada Koritaanka

Your Rights and Responsibilities When You Receive Services Offered by Home and Community Living Administration and Developmental Disabilities Administration

Adeegyada La Heli Karo

Waxaad xaq u leedahay in aad kala doorato adeegyada aad xaqa u leedahay in aad hesho. Adeegyadu waa kuwo iskaaga ah. Adeegyada ay Maamulka Nolosha Guriga iyo Bulshada iyo Maamulka Naafonimada Koritaanka bixin karaan kharashkooda waxaa laga yaabee in aysan kaa caawin dhammaan baahiyahaaga.

HCLA iyo DDA waxay adeegyo ku bixiyaan:

- Guri Qoys oo Dadka Waaweyn Lagu Xanaaneeyo, Xarunta Lagu Xannaaneeyo Waayeelka iyo Dadka Naafada ah, Xarunta Adeegyada la Wanaajiyay, Xarunta Kalkaalinta, ICF/IDs, Guryaha Wehelka, Guryaha Carruurta Lagu Koriyo, Guryaha Degaanka Leh ee Shaqaalaha Laysanka Haysta ee Carruurta; Guryaha Kooxda DDA, Guryaha Tababarka Kooxda; AMA
- Guriga uu qofku iska leeyahay. **Ogow:** HCLA iyo DDA ma bixiyaan adeegyo daryeel shakhsiyeed oo lacag lagu bixiyo 24 saacadood/maalintii oo guriga shakhsiga gudahiisa lagu bixiyo. Haddii la doonayo daryeel 24 saacadood ah, markaa waxaa la tixgelin karaa xulashooyinka adeeg kale.

Maareeyaha Kiiska ee Hay'adda Degaanka ee Qaabilsan Arrimaha Gabowga, Maareeyaha Kheyraadka Kiiska ee DDA, La-taliyaha Daryeelka Kalkaalinta, La-taliyaha Daryeelka, Takhasuslaha Adeegyada Bulshada ee Adeegyada Guriga iyo Bulshada, ama Maareeyaha Kiiska ee Xarunta Kalkaalinta HCS waxaa dokumentigan gudahiisa loogu yeeraa **shaqaale kiis**.

Xuquuqahaaga

Waxaad xaq u leedahay:

- Laguula dhaqmo si sharaf, xushmad iyo cunsuriyad la'aan ah;
- Loola dhaqmo hantidaada si ixtiraam leh;
- Aad si iskaashi ah ugula shaqaysid shaqaalaha kiiskaaga qorsheynta daryeelkaaga;
- Hayso adeegaha turjumaanka adiga laguu siiyo si lacag la'aan ah haddii aadan ugu hadli karin ama u fahmi karin luuqada Ingiriisiga si fiican;
- Laga dhigo macluumaada adiga kugu saabsan mid sir ah oo keliya loo isticmaalo xuduudaha sharciga uu qabo iyo xeerarka Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS);
- Aan laguugu qasbin in aad ka jawaabtid su'aalaha ama in aad sameysid wax aadan doonaynin in aad sameysid;
- Laguu sheego dhammaan waxyaabaha ku saabsan adeegyada aad heli karto iyo in aad sameyso doorashooyin ku saabsan adeegyada aad doonaysid ama aadan doonayn;
- Lagu sheegay qoraal go'aanada wakaalada ah kadibna qaado nuqul kusaabsan gunaanadka qorshahaaga taageerada ama qorshahaaga daryeelka;
- Diid dhammaan adeegaha;
- Dooro, shaqada ka cayri, ama beddel adeeg-bixiye u qalma;
- Hel natiijooyinka baaritaanka raadraaca ee adeeg-bixiye kasta ee shakhsi ah ee aad doorato;
- La hadasho kormeerahaaga haddii aan adiga iyo shaqaalahaaga kiiska oggolaanin arrintaas;
- Gudbi cabasho ama walaac wakhti kasta oo ku saabsan sida gobolka ama adeeg-bixiyuhu u maareeyo habka qorshaynta daryeelkaaga, qorshaha daryeelka, adeegyada, ama wax kasta oo aadan ku qanacsanayn ee degaankaaga adeegyada guriga iyo bulshada ku saleysan. Waxaad xaq u leedahay in aad cabasho gudbiso adiga oo aan ka baqeyn aargoosi. Waxaad cabasho ama walaac gudbin kartaa adiga oo wacaya 1-800-737-0617, email u diraya grievances@dshs.wa.gov, ama weydiinaya xubin kasta oo ka tirsan shaqaalaha DDA ama HCLA macluumaad ku saabsan sida loo gudbiyo cabasho;
- Codsato dhageysiga maamul la xiriirra xitaa haddii aad hore u samaysay cabasho;
- Sameyso cabasho adiga oo aan ka cabsan in dhibaato laguu gaysto xitaa haddii aad codsatay dhageysiga maamul la xiriira;
- La hadal qareen kuu doodaya adiga oo wacaya 1-888-201-1014; iyo
- Waa in aanan lagu xadgudbin, dayacin, maaliyad ahaan la dhiigmiiran, ama waa in aan laga dayrin. Si aad u hesho sharaxaadda ereyadan, booqo: https://www.dshs.wa.gov/altsa/home-and-community-services/types-and-signs-abuse. Haddii adiga ama qof aad taqaanid lagu xadgudbayo, la dayacayo ama laga faa'iidaysanayo, fadlan ka wac DSHS lambarka bilaashka ah 1-866 (End Harm) /1-866-363-4276 si aad ula hadasho shaqaale ku caawin kara.

Barcode label

16172

MAGACA MACMIILKA	LAMBARKA AQOONSIGA EE ACES

Mas'uuliyadahaaga

Waxaad leedahay mas'uuliyadda in aad:

- U oggolaato shaqaalaha kiiska in uu kuugu buuxiyo qiimeyntaada ugu yaraan sannad ahaan meel adiga kugu habboon;
- U oggolaato shaqaalaha kiiska in uu arko deegaanka aad ku nooshahay ugu yaraan si sannadle ah;
- Ina sii macluumaad ku filan si aan u sameyno qiimeyntaada oo aan kaaga caawino isku-dubbaridka qorshahaaga daryeelka;
- U sheegtid shaqaalaha kiiskaaga haddii uu qofkale kuu sameeyo ama kuu gaaro go'aanada maaliyeed ama caafimaad;
- Kaqayb gashid horumarinta lagu sameeyo qorshaha daryeelkaaga ama taageerada, kadibna sixiixdid;
- Waqtiga loo baahdo u jawaab oo la hadal shaqaalaha kiiskaaga;
- Dooratid daryeel caafimaad oo adiga kuu gaar ah;
- Dooratid daryeel bixiye u qalma;
- Kadhiga baaritaanada asalka daryeel bixiyaha kuwo khaas am sir ah;
- Fahantid in daryeel bixiyahaaga aan lacag lagu siinin adeegaha ama saacadaha aan la oggolaanin;
- U sheeg shaqaalahaaga kiiska haddii aad ku qabtid wax dhibaato ah daryeel bixiyahaaga ama haddii aadan qaadanin saacadaha uu sheegay daryeel bixiyahaaga;
- Lacag sii daryeel bixiyahaaga bil kasta haddii laguugu caawiyo in aad bixiso daryeelkaaga;
- Bixi goob shaqo oo ammaan ah;
- Ha u dhaqmin qaab qofka khatar-gelinaysa;
- U sheeg shaqaalaha kiiskaaga ka hor inta aadan bixin, haddii aad ula safrayso adeeg-bixiyahaaga daryeelka shakhsiyeed meel ka baxsan gobolka Washington; iyo
- U sheeg shaqaalaha kiiska haddii uu jiro isbedel ku dhaca:
  - ✓ Xaaladdaada caafimaadka;
  - ✓ Caawimaadda aad ka hesho qoyska, saaxiibbada, ama hay'adaha kale;
  - ✓ Xaaladdaada dhaqaale;
  - ✓ Meesha aad daryeelka ku qaadanayso;
  - ✓ Meesha aad gobolka Washington kaga nooshahay; ama
  - ✓ Deganaanshahaaga – haddii aad qorshayneysaa in aad guurto, ama aad hadda ku nooshahay meel ka baxsan gobolka Washington.

Mas'uuliyadaha Shaqaalaha Kiiska

Shaqaalahaaga kiiska ayaa wuxuu mas'uul ka yahay in uu:

- Kuula dhaqmo si xushmad iyo ixtiraam leh;
- Ilaaliyo arrimahaaga gaarka ah ama asturnaantaada;
- Kuu sheegaan waxa HCLA iyo DDA ay kuu qaban karaan, ama aysan, kuu qaban karin;
- In ay macluumaad ka helaan adiga iyo dadka kale si loo sameeyo qiimaynta lagu go'aaminayo heerka kaalmada aad u baahan tahay oo lagu go'aaminayo adeegyada aad wax ka dooran karto;
  - ✓ Qiimayntu waxay ka koobnaan doontaa awoodahaaga, xaddidaadahaaga, yoolalkaaga iyo dookhyadaada;
  - ✓ Qiimeynta waxaa kamid noqon doona caawimaada aad marhore kahelaysay ama aad kaheli karto dhinaca qoyska ama wakaalado kale iyo sida aad u doonaysid in adeegaha loo sameeyo;
- Kugu caawiyo in aad horumarisid qorshe daryeel ama qorshe taageero midkaas oo sheega caawimaad ay lasococto daryeelka shakhsiga ah oona kamid yihiin ahdaaftaada shakhsiyeed, waxyaabaha aad jeceshahay, iyo doorashooyinka;
- Helo macluumaad adiga iyo dadka kale kusaabsan si loo cusboonaysiiyo qorshahaaga daryeelka ama qorshahaaga taageerada sannad kasta ama marka ay isbedesho xaaladaada;
- Kusiiyo waqti kugu filan si uu u bixiyo macluumaada loo baahanyahay;
- U sheego mushkiladaha aad kuqabtid qorshahaaga daryeelka ama qorshahaaga taageerada marka ay soo baxaan;
- Ixtiraamo xuquuqahaaga oona bixiyo caawimaad dheeri ah oo kusaabsan helida adeegaha haddii aad qabtid daciifnimo jirka, dareenka, neerfaha, ama maskaxda ah; iyo
- Kugu caawiyo in aad heshid daryeel bixiye u qalma haddii aadan awoodin in aad mid hesho.

Barcode label

16172

MAGACA MACMIILKA	LAMBARKA AQOONSIGA EE ACES

Tilmaamo Horumarsan

Waxaad xaq u leedahay in aad sameyso tilmaamo horumarsan. Tilmaamaha horumarsan waxaa ka mid noqon kara dardaaranka nolosha ama awoodda qareenka ee waarta ee loogu talagalay daryeelkaaga caafimaadka. Tilmaamaha horumarsan ayaa waxaa ay koobayaan waxa aad jeceshahay ee ku saabsan daawada iyo/ama daryeelka caafimaadka maskaxda, oo ay ka mid yihiin xaqa aad ku aqabasho ama ku diido daawada, caafimaadka maskaxda, ama daaweynta qalliinka, marka aadan haysan awooda maskaxda aad ku gaari karto go'aamadaasi. Waad burin kartaa tilmaamahaaga horumarsan waqti kasta.

Adeegga Diiwaangelinta Cod-bixiyaha

Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyaha Qaranka ee 1993 wuxuu u baahan yahay in dhammaan gobollada ay bixiyaan caawimaadda diiwaangelinta cod-bixiyaha iyadoo loo marayo xafiisyadooda caawimaadda dadweynaha. Codsashada si la isku diiwaangeliyo ama ka noqoshada diiwaangelinta lagu coddeeyo ma ahaan doonto mid saameysa adeegaha ama tirada dheefaha ay dhici karto in lagaa siiyo dhinaca wakaaladan. Haddii aad jeceshahay caawimaad laguugu caawiyo buuxinta foomka diiwaangelinta qofka coddeeya, waan kugu caawin doonaa. Go'aankaaga ku aadan in aad isdiiwaan gelisid ama kanoqotid isdiiwaan gelinta wuxuu ahaan doonaa mid sir ah waxaana keliya loo isticmaali doonaa ujeeddooyin isdiiwaan gelinta coddeeyaha ah. Haddii aad aaminsantahay in qof lagu wareejiyay xuquuqahaaga diiwaangelinta ama si looga laabto isku diiwaangelinta lagu codeeyo, xaqa aad u leedahay in aad hawlahaaga khaas u noqotid ee ah go'aansashada haddii la isdiiwaangelinayo ama codsashada si la isku diiwaangeliyo in lacodeeyo, ama xaqaaga aad kudooratid xisbigaaga siyaasadeed ama doorasho siyaasadeed kale, waxaad fayl cabasho u diri kartaa dhinaca:

Washington State Elections Office
PO Box 40229
Olympia WA 98504-0229
1-800-448-4881

Sixiixaaga

Hoos saxiix haddii aad fahantay xuquuqdaada iyo mas'uuliyadahaaga, oo aad sidoo kale fahamtay mas'uuliyadaha shaqaalaha kiiskaaga.

Saxiixa Macmiilka	Taariikhda
Saxiixa Wakiilka Sharciga ah	Taariikhda

Ogeysiiska macaamiisha iyo shaqaalaha (Madaxa VI iyo VII), Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington waa loo-shaqeeye bixiya fursad loo siman yahay oo cidna kuma takoorto goob shaqo kasta, barnaamijyadeeda ama adeegyadeedda iyadoo ku saleynaysa da'da qofka, lab ama dheddig, dookha galmo, jinsiga, aqoonsiga jinsiga, xaaladda guurka, isirka, caqiidada, midabka, qofka asal ahaan dalka uu ka soo-jeedo, diinta ama aaminsanaanta, xiriirka siyaasadeed, xaaladda militeri, halyay hore oo si sharaf leh ciidanka uga baxay, Xilligii Fiitnaam, dhowaan ka tagay ama xaaladda halyeyga la ilaaliyo kale, jiritaanka wax dhibaato dareen, dhimir, naafonimo jireed ama isticmaalka eey hage ahaan loo tababbaray ama xayawaannada u adeegga qofka naafada ah, mushaarka loo siman yahay ama macluumaadka hiddo-sidaha.

Barcode label

16172

Xuquuqdaada iyo Mas'uuliyadahaaga Marka Aad Hesho Adeegyada ay Bixiyaan Maamulka Nolosha Guriga iyo Bulshada iyo Maamulka Naafonimada Koritaanka

Tilmaamaha Shaqaalaha Kiiska

1. Foomka dib-ula-eeg macmiilka si aad uga jawaabto su’aalo kasta oo ku saabsan xuquuqda iyo mas'uuliyadaha macmiilka. Dib-ula-eeg macmiilka marka la sameynayo qiimeynta hore ee CARE (ama marka la sameynayo qiimaynta Isbeddelka Muhiimka ah/Sannadlaha ah haddii foomka aan la saxiixin). Haddii uu jiro nooc la cusboonaysiiyay oo foomka ah, macmiilka ha saxiixo foomka la cusboonaysiiyay. Foomka ugu dambeeyay ee xuquuqda iyo mas'uuliyadaha macmiilka ee uu soo bandhigo shaqaalaha kiiska, macmiilkuna saxiixo, wuxuu beddelayaa foomamkii hore loo saxiixay.
2. Macmiilka ama wakiilkiisa ka codso in ay laba nuqul oo foomka ah saxiixaan si loo muujiyo in ay fahmeen xuquuqda iyo mas'uuliyadaha macmiilka marka uu helayo adeegyada ay bixiyaan Maamulka Nolosha Guriga iyo Bulshada iyo Maamulka Naafonimada Koritaanka.
3. Hal nuqul ku kaydi diiwaanka elektaroonigga ah ee kiiska macmiilka, nuqulka kalena sii macmiilka.